



## XAFIISKA QARAMMADDA MIDDQBAY U QAALIBILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

### WAR-SAXAAFADEED 20/2015

#### **Ergayga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya oo si aad ah u cambaareeyay weerarkii lagu qaaday baaruurtii kolonyoda aheed ee waday saraakiil ka soctay Imaaraadka Carabta**

**Muqdisho, 24 Juun 2015** – Ergayga-gaarka ah ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya, Nicholas Kay, ayaa si aad ah u cambaareeyay weerarkii maanta lagu qaaday baabuurta kolonyada aheed ee waday saraakiil ka soctay Imaaraadka Carabta, taas oo sababtay in ay dhintaan tira dad ah. Al-shabaab ayaa sheegatay masuuliyadda werarka.

“Waxaan si aad ah u cambaaraynayaa weerkii fool-xumada iyo naxdinta lahaa ee lagu qaaday maanta dad rayid ah iyo saraakiil ka socota caalamka oo ay ka go’need ka shaqaynta iyo kaalmaynta nabad iyo qaran dhisida Soomaaliya”, ayuu yiri Ergayga Gaarka ah, Nikolas Kay. “Weerarka waxaa loola jeeday in dadka ka socda caalamka laga leexiyo ama laga joojiyo kaalmaynta ay kaalmaynayaan Soomaaliya si ay u hesho mustaqbal wanaagsan. Hase ahaatee, Argagixisadu ma helayso/ gaarayso ujeedadaas.”

Ergayga, Kay, wuxuu si niyad ah tacsii oogu dirayaa Qaysaskii iyo saaxiibadii wax ku noqday weerarka, iyo Dowladda Imaaraadka Carabta.

Ergayga wuxuu ku soo celiyay sida ay Qaramada Midoobay ooga go’antahay sii wadida la dagaalanka dhibaatada ka dhalanaysa argagixisnimada iyo taageerida ay taageerayso Soomaalia, iyo Gobolkuba si loo xaqiijiyo arrimaha Amniga iyo Xasiloonida.